



Qaad Tallaabo Si Aad Uga Fogaatid Guri Ka Saarida



Joojinta Guri kasaarida ee CDC



Ka Hortag Guri Ka Saarista Lacag bixin la'aanta



Adeegyada iyo Illaha



Joojinta Guri Kasaarida ee CDC (Waxaa loogu talagalay inuu kuEkaado Luuliyo 31. 2021)

➤ Dib-u-dhigida Guri Kasaarida Lacagta Kirida aan labixinin

Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada (CDC) waxay soo saareen Amar looga hortagayo faafitaanka COVID-19. Amarka, iyo kordhinta Amarka, waxuu si ku meel gaar ah u joojinayaa ka saarida guriga kirada aan la bixinin laga bilaabo Sebtember 4, 2020 illaa Luuliyo 31, 2021, illaa inta codsigeeda uusan ka mamnuucayn amarka maxkamadeed eefederaal. Meesha ay khuseyso, ilaalinta CDC ee ka saarida guriga waxay dib u dhigi kartaa ka saarida guryaha kirada aan la bixinin LAAKINILLAALADA MA AHA MID TOOS AH !! Si aad u aragtid haddii aad u qalantid illaalinta ka saarida guriga, dib u eegida Bayaanka CDC oo fiiri fiidiyaha hoose:

- ✓ **Bayaanka Ingiriiska** https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/downloads/EvictionDeclare_d508.pdf
- ✓ **Bayaanka la tarjumay** oo lagu heli karo af Amxaari (Ingiriisi), Haitian Kariyool (Kreyòl Ayisyen), Hindi (हिंदी), Raashiyaan (Русский), Soomaali (Soomaali), Isbaanish (Español), Shiineeska Dhaqanka (簡體字) https://www.hud.gov/program_offices/public_indian_housing/covid_19_resources/rdf_other_languages
- ✓ **Fiidiyaha kaa caawinayo in aad fahamtid haddii aad u qalantid:** <https://www.youtube.com/watch?v=oODmNuXazgg>

Haddii aad u qalantid illaalinta guri ka saarista CDC, waa inaad aqrisaa oo saxiidaa Bayaanka oo aad u dhiibtaa PHA gaaga (haddii aad ku nooshahay guryaha dadweynaha) ama milkiilaha (haddii aad tahay kaqeybgalaha Foojarka). Waxaad ku sameyn kartaa tan boostada, i-meelka, fakiska ama shaqsi ahaan. Hayso nuqul Bayaanka Diiwaanadaada.

➤ Joojinta Kasaarida Guryaha CDC Ma Cafiso Kirada

- ✓ Sharciyada federaalka awgood, PHAs ma cafin karaan kirada aan la bixinin.
- ✓ Haddii aad u-qalantid joojinta ka saarida guryaha ee CDC, xusuusnow in kirada wali ay tahay mid la bixin karo iyo wixii haraa lacag ah oo kiro ah oo aan la bixinin ay sii joogteynayaan iney isku aruuran haddii aan la bixinin.
- ✓ **Sii wad akhriska** si aad u ogaatid illaha lagu heli karo si looga hortago ka saarista wixii ka dambeeya Luuliyo 31, 2021.

➤ Kuwa Haddeer Uqalma Illaalada Ka saarida Guryaha ee CDC - Isbeddellada waxey Bilaabanayaan Agoosto 1, 2021:

- ✓ Ilaa mooyee ka joojinta ka saarista muddada dheer ay ku shaqeyneyso sharciga gobolka ama sharciga maxalliga ah, PHA ama milkiilaha guriga ayaa kaa saari kara haddii aadan bixin kiradaada ama aadan gelin heshiiska dib-u-bixinta haddii heshiiska dib-u-bixinta uu bixiyo milkiilaha ama PHA.
- ✓ **Sharciga federaalku wuxuu ubaahanyahay 30-maalmoood oo ogeysiis guri ka saaris ah oo kirada aan la bixin**, laakiin muddo ogeysiis dheer waxaa u baahan kara sharciga gobolka ama degmada.






Kahortag Guri ka saarida Kirada aan la Bixinin - Qaad Talaabooyinka

- **Dib u xaqiiji Dakhligaaga.** Haddii daqligaaga hoos u dhacay ama daruufaha isbaddelayn, weydii PHA gaaga inuu xaqiijiyo dakhligaaga.
 - ✓ PHA waxay dib u eegeysaa dakhligaaga hadeeroo ay ku saxaysaa kiradaada si ay u muujiso isbedelka.
 - ✓ **Tallo!** Haddii isbeddelka dakhliga aan si dhakhsa leh loo soo sheegin, weydii PHA wax ku saabsan xeerkoodasaxitaanada kirada dib-u-bilaabaneyso (qaar ayaa laga yaabaa inay u oggolaadaan, qaar baa laga yaabaa inaysan ogolaanin).
 - ✓ Haddii ay ku haysatay dhibaato dhaqaale, weydii PHA haddii aad u-qalantid in lagaa dhaafi karo ugu yaraan culeyska kirada.
- **Wadarta Lacag bixinta.** Waxaad gadaal ka bixin kartaa wadarta lacagta marka la gaaro Luuliyo 31, 2021.
 - ✓ **Tallo!** Lacag bixinadakaalmada, \$300 / isbuuc ama 'Dheeraad ah' lacagaha shaqo la'aanta COVID, celinta canshuurta dakhliga, iyo bixinta amaahda canshuuraha carruurta laguma darin xisaabtaada sannadlaha ah ee dakhliga waxaana loo isticmaali karaa illaha lagu caawiyo kiradaada aan la bixin.
 - ✓ Haddii aadan helin lacagta dharaadka ah, fadlan booqo boggaan si aad u hubiso heerka lacag bixintaada oo aad u buuxiso foom fudud: <https://www.irs.gov/coronavirus/get-my-payment>.
- **Barnaamijka Gargaarka Kirada Degdegga ah (ERAP).** Haddii kiro laguugu leeyahay oo aad qatar ugu jirto in lagaa saaro guriga waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato caawintacusubeeijaarka hadda la heli karo. Halkan ayaa laga heli karaa macluumaadka barnaamijka: <https://home.treasury.gov/policy-issues/cares/emergency-rental-assistance-program>. Hirgelinta iyo kala mudnaanta ayaa ku kala duwan gobolka/deegaanahaanta.
- **Illaha Deegaanka.** PHA-gaaga ayaa laga yaabaa inuu wax ka ogaado illaha kale ee kaa caawinaya kirada, qarashaadka iyo baahiyaha kale ee aasaasiga ah.
 - ✓ Garaac 211 ama booqo 211.org Wixii macluumaad ah ee ku saabsan kaalmada dhaqaale ee degdegga ah.
 - ✓ **Sii wad Akhriska** si aad u heshid liiska illaha lagu heli karto.
- **Heshiiska Dib u bixinta.** Haddii aadan dib u bixin karin kiradaada isla markiiba, weydii PHA-gaaga ama milkiilaha gurigaaga (haddii aad kaqaybqaadatay foorjarka) haddii aad geli kartid heshiiska dib-u-bixinta kirada aan la bixinin.
 - ✓ Gelitaanka heshiiska dib-ubixinta waxay ku xirnaaneysaa iqtiyaarka PHA ama milkiilaha.
 - ✓ Kaqeybgalayaasha guryaha dadweynaha: shuruudaha heshiiska dib-u-bixinta waxaa lagu qeexayaa Ogolaanshaha PHA iyo Xeerka Daganaanshaha Joogtada ah (ACOP) iyo heshiiska dib-u-bixinta ee qoran.
 - ✓ Kaqeybgalayaasha foorjarka: waxaad u baahaneysaa inaad si toos ah ula gorgortanto mulkiilahaaga si loo go'aamiyo shuruudaha heshiiska dib-u-bixinta.
- **Xuquuqaha Kiraystaha iyo Ka Saarida Guriga Si Khaladka ah.** Haddii aad dareentid in si qalad ah lagaaga saaray guriga, la xiriir hay'addaada gargaarka sharciga ama hay'adaha adeegga bulshada.
 - ✓ Kaqeybgalayaasha guryaha dadweynaha: waxaad xaq u leedahay nidaamka cabashada sida ku xusan heshiiskaaga ijaarka.
 - ✓ Kaqeybgalayaasha foorjarka: waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa PHA-ga deegaankaaga.
 - ✓ **Tallo!** Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caawinta sharciga ee laga heli karo aaggaaga waxaa laga heli karaa Shirkadda Adeegyada Sharciga (<https://www.lsc.gov/what-legal-aid/find-legal-aid>), Goobta Daryeelka Waayeelka ACL (<https://eldercare.acl.gov/Public/Index.aspx>), Iyo LawHelp.org (<https://www.lawhelp.org/>).¹
- **La xiriir HUD si aad U wargeliso Takoorida.** Haddii aad rumeysan tahay inaad la kulantay takoorid, HUD waxay kugu dhiirogelineysaa inaad dacwad ku gudbisno taleefon ama khadka tooska ah.

¹HUD waxay kubixineysaadhoorillodokumintigaanoowacyigelintaada kaliya. HUD maysan qiimeynin mana taageerto websaadyadaan.



✓ Soo wac 1-800-669-9777

dadka tooska ah: https://www.hud.gov/program_offices/fair_housing_equal_opp/online-complaint

Adeegyada la xiriira COVID iyo Ilooyinka Laguuheli Karo

HUD waxay ku siineysaa linkiyadaankaliya wacyigalintaada. HUD maysan qiimeyn mana taageerto websaadyadaan.

- **Xarunta Illaha Macluumaadka ee HUD (IRC):** Wixii macluumaad guud ah ee ku saabsan barnaamijyada HUD i-meel ku soo dir HUD-PIHRC@ArdentInc.com ama soo wac 1.800.955.2232
- **Khadka Tooska ah ee Rabshadaha Qoyska:** <https://www.thehotline.org> ama 1 (800) 799-7233 ama TTY 1 (800) 787-3224 –waa khadka tooska ah ee qarsoodiga ah ee qof kasta ee la kulma rabshadaha qoyska, raadinaya macluumaad, ama wax ka weydiinaya dhinacyada aan wanaagsaneyn ee xiriirkooda. Haddii aadan si badqab ah ugu hadli karin taleefonka, u qor fariin qoraal LOVEIS eek u socoto 1 (866) 331-9474 ama booqo websaaydka si aad u bilowdo wada sheekeysiga khadka tooska ah.
- **211:** Soo wac 211 ama booqo 211.org Oo ka raadi koodhka zip ahaan. Kani waa khadka tooska ah ee kugu xiri kara caawinta degdegga ah, sida kirada iyo kaalmada tamarta, iyo adeegyada kale ee taageerada ee bulshadaada. Dhammaan wicitaanada waa qarsoodi, waxaa loo samayn karaa si qarsoodi ah, dadka soo wacaan waxay codsan karaan adeegyada tarjumaadda oo illaa 180 luqadood ah.
- **Caymiska Shaqo La'aanta:** www.usa.gov/unemployment –Soo ogow haddii aad xaq u leedahay faa'iidooyinka shaqo la'aanta iyo sida looga codsado gobolkaaga. Shuruucda cusub ee federaalka waxay bixiyaan faa'iidooyinka shaqo la'aanta ee iskood u shaqeystaha iyo shaqaalaha madax banaan, waxay ku daraan **\$300 dheeraad ah faa'iidooyinka toddobaadlaha ah** waxayna kordhiyaan tirada toddobaadyada la heli karo. Waxaa intaa dheer, gobollada waxaa loo oggol yahay inay bixiyaan faa'iidooyinka shaqo la'aanta cusub ee la xiriira COVID-19, sida marka qofka uga tago shaqada sababo la xiriira halista soo-gaarista ama caabuqa ama inuu daryeelo shaqsi kamid ah qoyska; Shaqo-bixiyaha wuxuu si ku-meel-gaar ah u joojinayaa shaqooyinka COVID-19 awgood, taas oo macnaheeda yahay in shaqaalaha aysan shaqo tagi karin; Ama qof la karantiilo laakiin wuxuu filanayaa inuu ku soo laabto shaqada ka dib markii karantiilka dhammaado.
- **Lacagaha Saameynta Dhaqaalaha (Lacagaha Kordhinta):** <https://www.irs.gov/coronavirus/get-my-payment> Soo ogow haddii aad u-qalantid lacag-bixinnada cusub ee Saameynta Dhaqaalaha ee gaaraya \$1,400 iyo sida loo dalbado lacagtaada. Haddii aadan horey u helin wareegyadii hore ee lacagaha kordhinta (wareegyada koowaad iyo labaad waxaa la soo saaray sannadaha 2020 iyo Janaayo 2021), boggaan wuxuu sidoo kale wataa macluumaad ku saabsan sida aad u hubin kartid u-qalmitaanka oo aad u dalban kartid lacagahaas.
- **Diyaarinta Canshuuraha Bilaashka ah iyo Dhibcaha Cashuurta Ilmaha Cusub:** <https://www.irs.gov/individuals/free-tax-return-preparation-for-qualifying-taxpayers> – Hel caawimaad bilaash ah xereynta canshuurahaaga, oo ay bixiyaan tabaruceyaal tababaran, ama e-fayl oo bilaash khadka tooska ah. Haddii aadan caadi ahaan u xareynin canshuur celinta oo aad carruur leedahay, waa inaad tixgelisaa xareynta sanadkaan si aad ugu qalanto canshuuraha canugga ee cusub. Sharciga cusub oo federaalka ah ayaa kordhiyay dhibcaha canshuurta carruurta illaa \$3,000 ilmo kasta oo jira 6 ama ka weyn iyo \$3,600 ilmo kasta oo ka yar da'da 6 sanno. **Bixinta bil-laha ah waxaa la soo diri karaa horraanta xagaagan, laakiin qoysaska waa inay xareeyaan canshuur celinta si ay u helaan lacagaha.** Wakhtiga kama dambaysta ah ee la xareynayo 2020 waa Maajo 17, 2021
- **Khadadka Caawinta Musiibada** 1 (800) 985-5990 (wac ama qoraal) - waa khadka taleefonka ee heer qaran oo loogu talo galay bixinta latalinta dhibaatooyinka degdegga ah ee dadka la kulma murugo shucuur oo la xiriirta masiibo kasta, oo ay ku jiraan COVID-19.
- **Hay'adda Waxqabadka Bulshada:** <https://communityactionpartnership.com/find-a-cap/> – La xiriir Hay'adda Waxqabadka Bulshada ee deegaankaaga si aad u ogaato adeegyada ay bixin karaan, sida kaalmada lacag-bixinta degdegga ah ee kirada ama qarashaadka.
- **Caawinta Bilasha:** www.usa.gov/help-with-bills Baro barnaamijyada dowladda si ay kaaga caawiso bixinta adeegga taleefonka, biilasha tamarta iyo kharashyada kale.
- **U-qalmitaanka Faa'iidooyinka:** www.benefits.gov - Soo ogow faa'iidooyinka dawladda ee aad xaqa u yeelan kartid, sida Gargaarka Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF), gargaarka cuntada, iyo daryeelka caafimaadka.
- **Macluumaadka Tallaalka COVID-19:** <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/> –Wax ka baro tallaalka COVID-19, oo ay ku jiraan sida waxtarkiisu uu yahay, inuu badbaado yahay, iyo sida aad mid ku heli karto.
- **Illooyinka Waxbarashada:** <https://belearninghero.org/parentstrong-2/> –Raadi ilaha waxbarashada iyo taageerada waalidiinta ka caawinaya carruurtooda inay wax ku bartaan guriga ama u baahan carruurtooda illo dheeraad ah oo waxbarasho ah.